

# Notification to Parents–Title I, Part A Right to Ask for Teacher’s and Paraeducator’s Qualifications

## Mukilteo School District

9/1/2023

Waalidiinta SHarafta leh,

Iyadoo la raacayo shuruudaha Xeerka GUUSHA Arday Kasta (ESSA) **Mukilteo School District** Waxaan jeclaan lahaa inaan ku ogeysiyo inaad codsan karto macluumaadka ku saabsan shahaadooyinka xirfadeed ee macalinka (macalimiinta) ardaygaaga ama xirfadlayaasha waxbarida [Qeybta Xeerka Guusha Arday Kasta 1112(e)(1)(A)].

**Macluumaadka u qalmitaanka xirfadeed ee soo socda ayaa laga yaabaa in la codsado madaamo ay la xiriiraan macalinka(miinta) ilmahaaga:**

1. Haddii macalinku buuxiyey shuruudaha shahaado qaadashada Washington ee heerka fasalka iyo maadooyinka uu macalinku ku bixiyo waxbarida.
2. Haddii macalinku wax ku barayo xaalad degdeg ah ama xaalad kale oo ku meel gaar ah oo Washington shahaadooyinka ama shuruudaha shahaado bixinta laga dhaafay.
3. Shahaadada Kuliyada iyo shahaado kasta oo qalin jabin ah ama shahaado uu haysto macalinku.
4. Haddii ardayga ay siiyaan adeegyo ay bixiyaan xirfadlayaasha macalin ahaaneed, iyo haddii ay sidaas tahay, shahaadooyinkooda.

**Macluumaadka u qalmitaanka xirfadeed ee soo socda ayaa laga yaabaa in la codsado ee la xiriira xirfadlayaasha waxbarida ilmahaaga:**

Barayaashu waa inay ahaadaan ugu yaraan siddeed iyo toban sano oo ay haystaan shahaadada dugsiga sare ama wax u dhigma, (si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan waxa loo arko inay u dhigmaan, fadlan akhri su'aalsha inta badan la isweydiyo ([dhukumiinti](#)))

<https://docs.google.com/document/d/1mS3yqB93IQymwsFxVv3WJd3-2B51Boz0RsAlsSIh5kw/edit>.

Intaa waxaa dheer, macalinka fasalka xanaanada waa inuu buuxiyaa **mid kamid ah** waxyaabaha soo socda

1. Waa inuu helay buundada u qalmida ee Adeegga Imtixaanka Waxbarashada (ETS) qiimaynta Macalinka Fasalka Hoose
2. Waa inuu haysto shahaado jaamacad la xiriirta ama ka sare ah kulliyad ama jaamacad la aqoonsan yahay
3. Ku kasbaday 72 dhibcood rubuc ama 48 buundooyinka semesterka heerka 100 ama ka sare ee kulliyad ama jaamacad la aqoonsan yahay
4. Waa inuu dhammaystay tababar macalin fasal hoose ahaan, barnaamijka ka diiwaangashan Golaha Tababarka iyo Tababarka ee Gobolka Washington.\* Wixii macluumaad dheeraad ah booqo [Guddida Shuruudaha shaqaalaynta ee ugu yar - Heerarka Barayaasha Xirfadlayaasha](#) [whhttps://www.pesb.wa.gov/paraeducator-certificate-program/minimum-employment-requirements/a.gov](https://www.pesb.wa.gov/paraeducator-certificate-program/minimum-employment-requirements/a.gov).

**Fiiro gaar ah:** Xirfadlayaasha shaqada waa inay shaqeeyaan iyagoo uu kormeerayo macalin shahaado haysta.

Dugsiyada ka shaqeeya barnaamijka dugsiga oo dhan, dhammaan xirfadlayaasha waa inay buuxiyaan shahaadooyinka u qalmitaanka xirfadda. Barnaamijka Caawinta Bartilmaameedka, kaliya xirfadlayaasha baraya wax ka qabashada Heerka I, ee hoos imaanaya kormeerka tooska ah ee macallin shahaado haysta, waa inay buuxiyaan shuruudaha sare.

Haddii aad rabto inaad codsato macluumaadka ku saabsan u-qalmitaanka macalinka ilmahaaga iyo xirfada macallinka, fadlan kala xiriir Heidi Straus barta 425-366-3600.

Si daacadnimo leh,

Heidi Straus  
Principal  
Lake Stickney